



Talaalka Novavax Nuvaxovid ee COVID-19

Abril 22, 2022

Bishii Febraayo 2022, Health Canada ayaa ogolaatay talaalka [Novavax Nuvaxovid](#) oo lagu duraayo dadka jira 18 sano ama kasii wayn. Talaalkaan waxaa loogu talagalay dadka aan awoodin (tusaale, sabab la xariirta xasaasiyad) ama aan doonayn inay qaataan nooc kale oo talaalka COVID-19 kamid ah.

Sida Talaalku u Shaqeeyo

[Novavax](#) waa talaal qayb ahaan barotiin ah. Wuxuu adeegsadaa cadad yar oo barotiin ah si uu u baro nidaamkeena difaaca inuu sameeyo difaacyada jidhka kuwaasoo aqoonsanaaya lana dagaalaya COVID-19. Talaalka kuma jiro fayraska COVID-19 kugumana ridi karo caabuqa.

Jadwalka Talaalka

Labo kuuro ayaa qasab ah kuuro xoojin ah ayaana aad loogu talinayaa. Waxay qaadanaysaa labo asbuuc kadib talaalka si aad u hesho difaac. Marka la ogolaado, Novavax ayaa loo qaadan karaa xoojin ahaan inkastoo [aan hadda](#) la ogolaan in xoojin ahaan loo qaato [Health Canada](#).

Isku qasidda Talaallada

[Novavax](#) ayaa loo isticmaali karaa midkii la doono labada kuuro ee koobaad ama xoojin ahaan, xataa haddii talaalkii hore uu ahaa nooc kale (tusaale, hal kuuro oo talaal kale oo COVID-19 ah iyo hal kuuro oo talaalka [Novavax ah](#)).

Faa'iidooyinka Talaalka

Talaallada COVID-19 [ee mRNA](#) (tusaale, Pfizer-BioNTech iyo Moderna Spikevax) ayaa la doorbidayaa waayo waxay difaac xoog badan ka baxshaan xanuunka daran.

Isbitaal in qofka la dhigo iyo dhimasho ka dhalata COVID-19, ayna ku jiraan faracyada cudurka. Tijaabooyinka caafimaadka ayaa muujiyay in [Novavax](#) uu ku haboon yahay kahortaga xanuun laga qaado cudurka COVID-19. Difaaca mudada fog wali lama xaqiijin karo. Sidoo kale kama warqabno waxtarka Novavax u leedahay dadka nidaamkooda difaacu liito, qaba xanuunka daciifiya difaaca jirka, horay uu ugu dhacay COVID-19, ama uur leh ama naas-nuujinaaya ilmo.

Ciladaha ka dhasha iyo Khataraha

Dadka qaar ayaa qabi kara cilado kadib markay qaataan talaalka – intooda badan waa kuwo fudud ilaa heer dhexe waxayna qofka hayaan hal ilaa sadex maalmood.



Ciladaha ayaa badanaa muujinaaya in talaalku uu shaqaynaayo. Ciladaha ugu badan waxaa kamid ah gaduudasho, xanuun, ama bararka meesha cirbada lagu muday, qandho fudud, madax xanuun, daal, murqo xanuun, xanuunka kala goysyada, qarqaryo, lalabo iyo/ama matag.

Haddii aad xasaasiyad xun ka qaado talaalka ama xasaasiyadu aysan kaa ba'ayn 3 maalmood kadib, u sheeg dhakhtarkaaga. Caafimaadka dadwaynaha ayaa la socda ciladaha si loo hubiyo in talaalku uu badqab u leeyahay dadka.



Talaalka Novavax Nuvaxovid ee COVID-19

Myocarditis iyo pericarditis waa noocyo kamid ah fashfashka ku dhaca qaybo kaladuwan oo wadnaha kamid ah. Waxay kugu dhici karaan kadib markuu kugu dhaco COVID-19 waxayna noqon karaan kuwo daran. Arintaan ayaan badanaa la arkin marka la qaato talaalka Novavax kadib, si dhow ayaana loola socdaa. Haddii ciladaan dhacdo, inta badan dadka ayaa dareema xanuun fudud waxaana lagu daweyaa daawo iyo nasiino, waxayna ka bogsoonayaan dhawr maalmood gudahood.

Raadso daryeel caafimaad haddii aad qabto xabad xanuun, neefta oo kugu yaraata, iyo wadno garaac daran kadib talaalka. Talaalka ayaa wali lagu talinayaa maadaama faa'iidooyinkiisu ka badan yihiin khatarhiisa.

Maadooyinka Talaalka iyo Xasaasiyadaha

Talaalka waxaa ku jira Polysorbate 80, cusbo, sonkor iyo maadooyinka aashitada (buffers). Kuma jiraan ukun, gelatin (hibbka doofaarka), gluten, latex, ilaaliyaasha fayraska, difaacyada jirka, ama aluminum. Marar dhif ah, xasaasiyadaha daran (anaphylaxis) ayaa imaan kara. Xasaasiyadaha ayaa la dawayn karaa badanaana waa kuwo muddo kooban jira. Raadso daryeel caafimaad haddii aad qabto dhibaato dhanka neefsiga ah, finan, ama bararka wajjiga iyo dhuunta.

Dadka ka qaada xasaasiyada daran talaal kale oo COVID-19 ah ama maadada polyethylene glycol (PEG) ayaa qaadan kara talaalka [Novavax](#).

Dib u dhig talaalka haddii aad:

- Qabto qandho ama astaamaha kale ee COVID-19, sug ilaa aad bogsooto kahor intaadan qaadan talaalka.
- Lagaa doonaayo inaad [is-keliyeesho](#), fadlan dib u dhig balantaada taariikh danbe, marka mudada aad galayso keli-yeelida ay dhamaato.

La hadal dhakhtarka marka hore, haddii:

- Aad uur leedahay, aad uur qaadi karto ama aad naas-nuujinayso
- Aad qabto xanuun daciifiya difaaca jirka
- Aad qabto nidaamka difaaca jirka oo daciif ah sabab la xariirta xanuun ama daawo aad cunto
- Aad xasaasiyad qaaday afar saacadood gudahood kadib markaad qaadatay kuurada koobaad ee talaalka COVID-19.
- Aad xasaasiyad xun ka qaaday wax kamid ah maadooyinka talaalka [Novavax](#), ayna ku jirto xasaasiyad aad ku qabto Polysorbate 80

Wixii xog dheeraad ah, kala hadal dhakhtarkaaga ama booqo webseedkeena oo ah toronto.ca/COVID19.



Ilaha

Gudigga Qaran ee Talal bixinta Talaalka Bayaannada iyo daabacaadaha- COVID-19. Oo laga heli karo <https://www.canada.ca/en/public-health/services/immunization/national-advisory-committee-on-immunization-naci.html#COVID-19>

Novavax, Inc. Febraayo 17, 2022. Jaan-tuska Maadada – Nuvaxovid. Oo laga heli karo <https://COVID-vaccine.canada.ca/info/pdf/nuvaxovid-pm-en.pdf>